

**Sharciga 27 Maajo, 1958, lamba. 14**

**Wax ka baddalka qodobka 94 Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya.**

## **MAAMULHA**

Marku arkay qoraalka lagu meelmariyay Golaha Xeer-dejinta;

### **WUXUU XEERINAYAA SOONA SAARAYAA**

Xeerka soo socda:

#### **Qod. 1**

Qod. 94 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya ee lagu meelmariyay Amarka 2 Maajo 1956, lamba. 5 waxaa loo baddalay sidaan:

Garsoorayaasha Dadweyne ee Maxkamadda Dambiyada Culus waxaa lagu magacaabayaa xeer Wasaaradda Cafiska iyo Garsoorka sanad kasta marka la dhagaysto Golaha Wasiirada, waxaana laga soo xulanayaa muwaadiniinta soomaalida ee ku caanbaxay toosnan oo wax akhri kara waxna qori karaa.

Garsoorayaasha Dadweynaha ee qabanaya xilka Xaafiiska, waa in ay saddex cisho ka hor garmaqalka yimadaan, iyagoo ah siddeed qof oo Guddoomiyaha Maxkamadda Dambiyada Culis uu u qoriteturay. Lixda ugu horreeya oo la soo sooco ayaa hawlgalaya, labada kalana waxay noqonayaa keyd.

Dadweyne u Doodaha wuxuu ka qaybgalayaa qori-tuurka lagu soo saarayo Garsoorayaasha Dadweynaha. Ka dib Guddoomiyaha Maxkamadda Dambiyada Culus wuxuu u sheegayaa isgoo u marsiinaya Kaalinta maalinta iyo saacadda ay dhacayso xulashada. Inta aanay xilkooda gudan, Garsooryaasha Dadweynaha waxay ka hor dhaaranyaan Guddoomiyaha Maxkamadda Dambiyada Culus ama Guddoomiyaha Qaybta Dambiyada Culus, dhaartaaso qaabkaan u dhacaysa: "waxaan ku dhaaranayaa in aan si wanaagsan iyo xilkasnima leh u gudanayo, danta caddaadda keliya, waajibaadka xafiiska ee la igu aaminay iyo in aan xajiyo sirta." Xeerka la soo sheegay waxaa xitaa lagu dabbaqayaa dhismaha Maxlamadda Racfaanka ee Dambiyada Culus.

#### **Qod. 2**

Waxaa la tirtiray xeerka qod 94, faqradda IV ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya iyo mid kasta ee aan la jaanqaadi karin Xeerkan.

#### **Qod. 3**

Xeerkaan wuxuu dhaqngalayaa marka lagu baahiyio Faafinta Rasmiga. Xeerkaan waxaa lagu darayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka lagu baahiyay Faafinta Rasmiga. Cid kastana wuxuu ku waajibinayaa in ay u hoggaansanto iyo ka xeer ahan Soomaaliya in loo hoggaansamo.

Muqdisho 27, Maajo 1958.

Maamulaha

**Piero Franca**

**CABDULLAAHI CIISE MAAXMUUD**